

INFORMATIONSBILAD

Patientinformation från Sveriges smittskyddsläkare
Somali – Latent tuberkulosinfektion – när behandling ges

Caabuqa qaaxada qarsoon - marka daawada ka hortegeysa qofka la siiyo

Macluumaadka bukaanka ee ka imanaya dhakhaatiirta ka hortagga cudurrada faafa ee Iswiidhan.

Waa maxay sababta aan u helay macluumaadkan?

Natiijadii baaritaankaaga ayaa waxay muujisay inaad qabto caabuqa qaaxada ee qarsoon. Dhakhtarkaagu wuxuu qiimeeyey inaad u baahan tahay daawo si loo yareeyo khatarta ah inaad wakhti dambe ku xanuunsato qaaxada.

Halkan waxaad ku ogaan doontaa waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ka fikirto.

Maxay tahay qaaxada qarsooni?

Caabuqa qaaxada qarsoon waxay macnaheedu tahay in lagu qaadsiiyay bakteeriyada qaaxada, laakiin aanad u jiran. Marka uu qofku qaado bakteeriyada qaaxada, xubnaha difaaca jirka ayaa ka bixiya falcelin, waxaana lagu ogaan karaa ama lagu cabbiri karaa baaritaan dhiigga ama maqaarka ah. Dadka cudurka qaada intooda badan waxay sii ahadaan kuwo caafimaad qaba, laakiin waxaa jira halis yar oo ah in lagu xanuunsado qaaxada wakhti dambe nolosha.

Khatarta ah inuu qofku mustaqbalka qaado cudurka qaaxada waxay ku badan tahay dadka dhawaan la qaadsiiyay cudurka, haweenka uurka leh, haweenka dhowaan umulay, carruurta, dhallinyarada, iyo dadka hab-dhiskooda difaaca jirku uu daciif yahay sababo la xiriira cudur ama qofka oo dawooyin qaata awgood.

Ma la kala qaadaa qaaxada qarsoon?

Maya, qaaxada qarsoon lama kala qaado. Qaaxadu waxay faafi kartaa oo keliya marka uu qofku u xanuunsado oo uu cudurka ku dhaco sambabbada.

Ma u baahanahay daaweyn loogu talagalay qaaxada qarsoon?

Haa, dhakhtarkaagu wuxuu qiimeeyay inaad u baahan tahay daaweyn si loo yareeyo khatarta ah inaad mustaqbalka u jirrato cudurka qaaxada.

Waa maxay waxa ay tahay in aan maanka ku hayo?

Ma jiro hab lagu xaqiijin karo in dhammaan bakteeriyadu daaweynta ka dib ay kaa tagtay, oo aad mustaqbalka mar kale qaadi karto cudurka.

Haddii mustaqbalka aad yeelato calaamado ama dhibaatooyin muddo dheer socda (wax ka badan saddex toddobaad), sida qufac, qandho, dhidid habeenkii ah ama miisaanka oo si aan ula kac ahayn kaaga yaraada, waa inaad la xiriirtaa dhakhtar. U sheeg dhakhtarka in hore lagaaga daweyey caabuqa qaaxada ee qarsoon.

Macluumaadka lagala xiriirayo (Kontaktuppgifter)

Qaybta qaabilaadda (Mottagning).....

.....

Telefoonka (Telefon).....